



Waalid ahaan door ayaa weli leedahay!

Haddii aad go'aan adag ka qaadato daroogada
cannabis wuxuu saamayn ku yeelanayaa da'yarkaaga.

Aragtidaada weli mudnaan koowaad ayay leedahay!


Maadaama aad leedahay ubad da'da dhigashada dugsiga sare jiro ayaa qoraal-warbixineedkaan lagu soo diray. Waa da' dhallinyarada badidooda ay muujiyaan madaxbannaani, xoogana saaraan wakhtilummis iyo saaxiibada. Haseyeeshe, ha iloowin in waalid ahaan aad door weli leedahay!

Waxaa suurtagal ah inaad maqashay maandooriyayaasha loo yaqaanno xashiish iyo marijuana – labadoodba waxaa loo yaqaanno cannabis. Haddii lays barbardhigo ardayda dhigata dugsiyada sare iyo kuwa dhigata dugsiyada dhexe waxaa la oran karaa waxaa isticmaalka maandooriyaha badsada kuwa dhigata dugsiyada sare. Macneheeda ma aha in dhamman dhallinyarada ay maandooriyaha tijaabiyeen, dhallinyarada magaalada Stockholm ku nool badidood weligood ma tijaabinin.

Sababta ugu wayn oo dhallinyarada ugu fogaadaan ku isticmaalka cannabis, waxaa weeyaan waxay ogsoon yihiin in waalidiintooda aysan raali ka ahayn falxummadaas. Sidaas awgeed, adigu door wayn ayaa ciyaaraysaa. Ha illoowin in inantaada ama wiilkaaga u tixgelinaayo aragtidaada – xitaa haddii aad moodo in uu iska dhego tiraayo.

Dhowr naseexooyin:

- Wadahadal ku saabsan cannabis la yeelo ubadkaaga, u muuji inaad danaynayso.
- Hab aad u qeexan u wargeli halista cannabis iyo in uu sharcidarro yahay – hab-dhaqan u deji.
- Hab aan mugdi ku jirin u muuji aragtida adag aad ka qabto khamriga iyo tubaakada.
- Wadahadal la yeelo waaliidinta kale.
- Aqriso warbixin ku saabsan cannabis iyo sida loo shaacbixiyo.
- Haddii isbedel aad ubadkaaga ka dareento kaasoo walwal kugu abuurto, la xiriir *Maria Ungdom* ama maamulka Dowladda hoose.



Laga soo xigsaday: Cilmi-baaristii la magac baxday Stockholmsenkäten sannad-dugsiyeedka labaad dugsiga sare 2012.

Warbixin muhim ah ku saabsan cannabis

Cannabis waa magaca koox dhir loo yaqaanno (Cannabaceae), sida xashiish, marijuana iyo saliidda xashiisha laga sameeyay.

Dhirta waxaa ku jira maadada THC keenta markhaamida. Falxummada mudada dheer ee daroogada cannabis waxay siyaabo kala duwan saamayn ku yeelata jirka – siiba maskaxda.

Midabka daroogada Marijuana waa cagaar, wuxuu leeyahay muqaalka caws qallalan oo la soo shiiday. Xashiishka waxaa loo iibiyaa isago gabal-gabal yaryar ah, midibkiisa-na waa inta u dhaxaysa buni qafiif iyo maddow. Labada nooc ba badi ahaan waa la cabba, iyagoo sigaar ahaan loo duuduubay ama beeb. Qiiqiisa wuxuu leeyahay ur macaan.

Qofka cabbay daroogada cannabis wuxuu noqon karaa qof degan oo hadal iyo qosol badan ama sida qof hurdo hayso oo ammusan. Wuxuu kaloo muujin karaa qoomamayn, rabitaan-xummo, dareen-cabsi iyo in uu daba-joog dareemmo. Garaaca halbowlaha oo kor u kaca, af-qalalan, indha-gaduud iyo baahi dheeraad waa calaamado kale lagu garto, laakinse way adag tahay garashada qofka maandoorsan.

Spice waa maadooyin la warshadeeyay oo muqaalka cannabis leh. Iyadoo lagu labay waxyaale kale ama tubaako ayaa la cabba. Maadooyinka badi-dooda ee Spice laga sameeyay waa wax maanka dooriya waana sharcidarro ku isticmaalkooda.

Daroogada cannabis waa ka mamnuuc dalka Iswiidan, gadideeda, iibsashadeeda, haysashadeeda iyo isticmaalkeeda ba.

Laga soo xigsaday: drugsmart.com oo ah ururka warfaafinta ammuuraha khamriga iyo maandooriyeyaasha (CAN, Centralförbundet för alkohol- och narkotikaupplysning), cannabishjalpen.se, folkhalsomyndigheten.se

Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan kartaa stockholm.se/nejtillcannabis

Dowladda hoose ee magaalada Stockholm waxay soo diyaarisay bogga olo-olaynta, halkaas ayaa ka heli kartaa isku-xireha bogagga warbixin dheeraad ku saabsan daroogada cannabis. Aqoon-korsasha waa gogolxaar wanaagsan. Taasoo ku sahlín doonto dood la yeelashada da'yarkaaga. Isagu wuxuu ka soo xigsadaa saaxiibadiisa, filimada, muusikada ama shabakadda internetka.

Haddii aad arrin iswaydiinayso ama aad walwal daraymayso waxaad la xiriiri kartaa Maria Ungdom.

08-508 43 710 (maalinimmo)

08-123 47 410 (degdeg)

Waxaad kaloo la xiriiri kartaa Maamulka adeegga bulshada ka hawlgala maamulka Dowladda hoose.

Warbixin ku saabsan siyaabaha loola xiriiro waxaad ka heleysaa

stockholm.se/kontaktunga

Maamulka Dowladda hoose ee magaalada Stockholm wuxuu ku hawlan yahay in siyaabo kala duwan u suurta geliyo carruurta iyo dhallinyarada in ay ku barbaaraab deegaan aan maandooriye lahayn. Sidaas awgeed, waxaan rajeynaynaa in warbixintaan ku saabsan daroogada cannabis ay adig waalid ahaan wax ku tarto – maadaama aad tahay qofka ubadkaaga ugu muhimsan!

Anna König Jerlmyr
Wakiil-hay'adeedka
adeegga bulshada

Lotta Edholm
Wakiilka ammuuraha
dugsiyada

” Qof doonaayo in hooyo iyo aabe ku abuuro niyadjab ma jiro. ”

Dhahida waxaa laga soo xigsaday da'yar ka tirsan kooxda xoog-saarka.

يمكنك أن تجد هذه المعلومات على الموقع stockholm.se/nejtillcannabis

You can find this information at stockholm.se/nejtillcannabis

Warbixintan waxaad ka heli kartaan bogga internetka stockholm.se/nejtillcannabis

አስተውሎል/ሊ(ረክ/ክዩ):- እዚ ሓበሬታ ኣብዚ ስዒቡ ዝመጽእ ናይ ድሕረገጽ (ኢንተርኔት) ኣድራሻ :
ማለት stockholm.se/nejtillcannabis ክትረኽቡ/ብዮ ትክእል/ሊ. ::

stockholm.se/nejtillcannabis